Helsinki



# Tallaalada hargabka ee lacag la’aanta ah ee reer Helsinki waxay billaabanayaan 9:ka Nofembar

**Tallaalada xilliyeedyada hargabka waxaa baraha tallaalada looga bixinayaa ballan oo kaliya.**
Wakhtiga tallaalka waxaa
si elegtroonig ah looga qabsan karaa cinwaanka influenssarokotus.hel.fi ama iyadoo la wacayo lambarka 09 310 46300.
Lambarka wakhtiga ballantu wuxuu maalmaha shaqada shaqeeyaa saacadda 8–16.

Tallaalada waxaa la bixiyaa Isniin illaa iyo Jimco todobaadka 46, 47 iyo 48.
Adiga oo caafimaad qaba oo kaliyaata imow barta tallaalka

**Baraha tallaalku waxay furanyihiin**

- 9.–20.11. Isniinta illaa iyo Khamiista saacadda u dhexeysa 8–18 iyo Jimcaha saacadda u dhexeysa 8–15.
- 23–27.11. Isniinta illaa iyo Khamiista saacadda u dhexeysa 8–16 iyo Jimcaha saacadda u dhexeysa 8–15.

Haddii aadan tallaalka doonan karin todobaadyada tallaalka, waxaad wakhti tallaal ka qabsan kartaa todobaadka 48 kaddib
rugtaada caafimaadka.

**Baraha tallaalka ee dadka degmada deggan waa**

- Xarunta dadka waayeelka ah ee **Kustaankartano**, Daarta A dabaqa 1aad, Oltermannintie 32
- **Liikuntamylly**, Jauhokuja 3
- **Barta tallaalka ee Jätkäsaari**, Tyynenmerenkatu 6 L 3
- **Xarunta adeegga ee Munkkiniemi**, Laajalahdentie 30

**Tallaalada hargabku waa u lacag la’aan**

- dumarka uurka leh
- carruurta kayar 7 sano (laga billaabo 6 bilood jirka illaa iyo 6)
- jrro ay qabaan darteed dadka ku jira kooxaha u nugul halista hargabka
- dadka buuxiyay 65 sano
- dadka gelaya dhibowga ciidanka iyo gurmadka ciidanka ee aan qasabka aheyn
- ehelka u dhow dadka sida aadka ugu nugul hargabka halista ah
- shaqaalaha ka shaqeeya sooshalka iyo daryeelka caafimaadka iyo daryeelka daawada

**Xaaladda fayruska Korona ee jirta darteed ayaan waxaan feejignaan gaar ah siinaynaa ammaanka
macaamiisha iyo shaqaalaha.**

Toinen linja 4 A SB 6000, 00099 MAGAALADA HELSINKI Telefoonka 09 310 5015 Fakiska 09 310 42504 www.hel.fi/sote

## Tallaalka hargabka ee macaamiisha rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka

Haweenka uurka leh iyo carruurta jirta da'da rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanku waxay tallaalka looga hortegayo
hargabka xilliyeed qaadanayaan laga billaabo Oktoobar marka ay ku jiraan booqashada rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka. Waxaa kale oo ay macaamiishku wakhtiga tallaal xilliyeedka hargabka ee gaarka ah qabsan karaan iyagoo isticmaalaya nidaamka ballan qabsashada elegtroonigga ah ee rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka (asiointi.hel.fi).

Wakhtiyada tallaanka hargabka waxaa aad loo helayaa todobaadka ololaha ee 48, yacni 23.–27.11. Macaamiishu waxay wakhtiga tallaalka ka qabsan karaa rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka ee ay doonayaan.

## Dugsiileyda, ardayda, isbitaallada iyo guryaha adeegga

### Dugsiileyda

Dugsiileydu waxay tallaalka hargabka ka qaadan karaan barta tallaalka magaalada ee dadka ka dhexeysa ama
daryeelka caafimaadka dugsiga. Waalidiintu waxay wakhtiga tallaalka ka qaban karaa kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga cunugga.

Xaaladaha Korona ee jira dartoo ayaa qaar ka tirsan dugsiileyda waxaa lagu hagayaan in ay tallaalka hargabka
ka qaataan baraha tallaalka ee magaalada todobaadyada tallaalka ah ee ah 46, 47 iyo 48.

### Ardayda

Ardayda waxay ugu horreyn tallaalka ka helayaan goobta shaqada ee daryeelka caafimaadka ardayda
ee machadkooda iyagoo wakhti ka qabsanaya. Daryeelka caafimaadka ardayda ee machadyadu waxay ardaydooda ku wargelinayaan maalmaha rasmiga ah ee tallaalka iyo nidaamkooda.

Goobta shaqada daryeelka caafimaadka ardayda ee meel la isugu keenay ee ku taal cinwaanka Mechelininkatu 46, dabaqa 4.
waxay ardayda ugu adeegtaa wakhti la qabsaday xittaa arrimaha tallaal xilliyeed hargabka ku saabsan Isniinta
illaa iyo Khamiista 2.–26.11. Lambarka wakhti qabsashada ee goobta shaqada meel la isugu keenay waa 050 310 5564.

### Dadka da'da ah iyo macaamiisha kale

Qaybaha jiifka ee isbitaallada Helsinki, xarumaha dadka waayeelka ah, guryaha adeegga, goobaha daryeelka baxnaanada iyo naafada garaadka iyo guri ku xannaanayntu iyaga ayaa macaamiishooda tallaalaya.

### Shaqaalaha ka shaqeeya sooshalka iyo daryeelka caafimaadka iyo daryeelka daawada

Shaqaalaha ka shaqeeya sooshalka iyo daryeelka caafimaadka iyo daryeelka daawada waxay tallaalka hargabka
ugu horreyn ka helayaan daryeelkooda caafimaadka shaqada.

## Maxey muhiim u tahay in la qaato tallaalka hargabka?

Tallaalka oo aad qaadato waxay naftaada iyo ehelkaadaba uga ilaalinaysaa hargabka iyo cudurkada ka dambeeya ee uu sababo. Qaadashada tallaalku waxay muhiimad gaar ah leedahay, haddii dadka kuu dhow uu ku jiro qof, kaas oo ku jira
halis weyn oo uu ugu jirran karo hargab daran.

Iaalinta laga helo tallaalka asxaabta la siiyay waxaa ka faa'iidaya tusaale ahaan dadka ka weyn 65 sano, haweenka
uurka leh, carruurta 6 bilood kayar, dadka qaba cudurada daba-dheeraaday iyo dadka kale ee u nugul qaadista hargabka daran.

Qaadashada tallaalku waxay muhiimad gaar ah leedahay sannadkan, sababtoo ah waxaa suurrgal ah in iskumar
la qaado fayruska Koronaha iyo hargabka. Caabuqyada iskumarka ah waxay kordhin karaan halista cudurka daran.

Tallaalidda hargabka ee firfircoon ah waxaan saameyn lagula yeelan karaa, in Helsinki aanay sannadka dambe iskumar
ka dillaacay safmarka hargabka iyo fayruska Korona.

**Macluumaadka dheeraad ah ee tallaalada Helsinki** waxaad ka heleysaa shabakadda
influenssarokotus.hel.fi
iyo talobixinta caafimaadka, tel. 09 310 10023 (24ka saacadood).

**Macluumaadka tallaalka** waxaa laga helaa bogagga Wakaaladda caafimaadka iyo nololwanaagga www.thl.fi.